

FAAFINTA

الرسمية



RASMIGA

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 7-aad Garowe 15 September 2005

Faafinta bilwalba soo baxda

lam 9
جريدة الشهرية

Qaybta faafinta rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland
Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 Lambar walba. Rukunka Sanadkii waa Sh/So. 170,000 dalka gudahiisa, dibadda Sh/So. 500,000 Rukunka la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yay waa Sh/So. 3,000 Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Kowaad

Sharci

Qaybta Labaad

Xeer

Waxba Ma Leh

Qaybta Sadexaad

Talooyin, isgaarsiin, ogaysiis, iidheh, IWM
Waxba ma leh

Sharci Lr. 5. ee 8/09/2005, kuna saabsan hab-maamuuska Dawladda Puntland

Bogga

146 – 148

**DAWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIYA**
Xafiiska K/simaha Madaxweynaha



**PUNTLAND STATE
OF SOMALIA**
Office of the Vice President

Sharci Lr. 5. ee 8/09/2005, kuna saabsan hab-maamuuska Dawlada Puntland.

K/S Madaxweynuhu

MARKUU ARKAY Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya.
MARKUU GARAWSADAY Muhiimada Sharcigan hab-maamuusku Dawladda u
leeyahay
MARKUU ARKAY Ansixinta Golaha wakiillada Puntland ee XGGW /DGPL/
141/2005, ee 01/08/2005.
TIXGELIYEYNA Rayiga Golaha Xukuumada.

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda :-

Qodobka Kowaad

Waxaa Golaha wakiillada Puntland ansixiyeen sharciga hab-maamuuska Dawladda.

Qodobka Labaad

Nuqullada asalka ah waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Gollaha Wakiillada.

Qodobka Saddexaad

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka K/simaha Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland, markaa ayaa sharciga kamid noqonayaa shuruucda Dawladda Puntland qof kastana ay waajib ku noqonaysaa inuu dhawro, kuna dhaqmo.

Xasan Daahir Maxamuud
Madaxweyne-kuxigeenka
ahna Sii-hayaha xilka Madaxweynaha

J.

**DOWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA K/S MADAXWEYNAHA**



**PUNTLAND STATE
OF SOMALIA
OFFICE OF THE ACTING PRESIDENT**

SHARCI LAM 5

Date 8/09/2005

MARKUU ARKAY: Dastuurka Puntland

MARKUU ARKAY: Sharciga Hab-maamuuska Dawladda Puntland

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qobo Sharcigan

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga Soo Socda:

Sharcigaas oo ah kan hab-maamuuska Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya, waana kan hoos ku qoran:

Eray bixin

A)

- 1- Madaxtooyo -waxaa loola jeedaa Madaxweynaha iyo Ku xigeenkiisa.
- 2- Gudoonka Golaha Wakiilladda -Waxaa lola jeedaa Gudoomiyaha iyo Labadiisa kuxigeen.
- 3- Gudoonka Garsoorka – waxaa loola jeedaa Gudoomiyaha Maxkamada Sare
- 4- Golaha Wakiillada – Waxaa loola jeedaa Xubnaha Golaha Wakiillada Puntland.
- 5- Golaha Xukuumada – waxaa loola jeedaa- Wasiiradda iyo Wasiiro kuxigeenada Puntland.
- 6- Golaha Garsoorka – waxaa loola jeedaa xubnaha Gudiga Garsoorayaasha.
- 7- Gudoomiye yaasha Gobolada- waxaa loola jeedaa gudoomiyaha Gobolka iyo kuxigeenadiisa
- 8- Agaasime yaasha Guud - waxaa loola jeedaa Agaasimyaasha Guud ee Puntland.
- 9- Gudoomiyasha Hanti Dhawrka iyo Kan Bankiga – waxaa loola jeedaa labada gudoomiye ee Hay'adahaas.

- 10-Taliyaasha Guud ee Ciidamada - waxaa loola jeedaa Taliyeyaasha Guud ee Ciimadama Puntland.
- 11-Gudoonka Degmada – weaxaa loola jeedaa Gudoomiye yaasha Golaha deegaanka.
- 12-Goleyaasha Deegaanka – waxaa loola jeedaa xubnaha Goleyaasha Degmooyinka Puntland
- 13-Gudoomiyaasha Maxkamadaha Rafcaanada – waxaa loola jeedaa Gudoomiyaasha Maxkamadaha Rafcaanada Gobolada Puntland.
- 14-Gudoomiyeyaasha Maxkamadaha Derajada Iaad - waxaa loola jeedaa gudoomiyaasha Maxkamadaha Derajada Iaad ee Degmooyinka Puntland.

B)

- 1- Madaxtooyo
- 2- Gudoonka Golaha Wakiillada
- 3- Gudoonka Garsoorka
- 4- Golaha Wakiilada
- 5- Golaha Wasiirada
- 6- Golaha Garsoorka
- 7- Gudoomiyalaasha Hanti-dhawrka iyo Bankiga Dhexe
- 8- Agaasimayaasha Guud
- 9- Gudoomiyaasha Gobolada
- 10-Taliyaasha Guud ee Ciidamada
- 11-Gudoonka Degmada
- 12-Goleyaasha Deegaanka
- 13-Gudoomiyaasha maxkamadaha Rarcaanada
- 14-Gudoomiyayaasha Maxkamadaha Derajada Iaad

Xasan Daahir Maxamuud
Ku simaha Madaxweynaha Dawlada Puntland

Waxaa Xeerarkan Si Digital ah U diyaariyey:-

Xafiiska Waaxda Aarkiifiyadda , Maktabada & Cilmibaarista GWDPL.

Email:- Aarkiifiyaddagolaha01@gmail.com

Tell:- 0907732837, 0907762400